



# XAAQUUQDA IYO WAAJIBAADKA

**SHAQAALAHAD WIC:** Akhris ahaan udulmar boggaan.

## XAAQUUQDAYDA

- **Cuntooyinka WIC:** Hadaan xaqqaa uyeesho WIC, waxaan helayaa Kaarka WIC si aan dukaanka adeegga oga iibsado cuntooyin caafimaad qaba. Waan ogahay inaan WIC aysan bixin dhamaan cuntooyinka ama cuntada caruurtada oo dhan ee aan ubaahanahay bishii oo dhan.
- **Macluumaadka Nafaqada:** Waxaan helayaa macluumaad kusaabsan mawduucyada nafaqada ee aan xiisaynaayo.
- **Taageerada Naasnuujinta:** WIC ayaa iga caawin doonta taageerana iga siin doonta naasnuujinta.
- **Macluumaadka iyo Gudbinada Daryeelka Caafimaadka:** WIC ayaa iisheegaysa macluumaadka kusaabsan talaalada, jawaabta dhakhtarka, iyo adeegyada kale ee aan ubaahan karo.
- **Qadarinta Guud:** WIC iyo shaqaalahad dukaanka ayaa iila dhaqmaaya si cadaalad iyo sinaan leh, oo ay qadarin iyo xushmad kujirto.
- **Habdhaqan Cadaalad kudhisaa:** Shuruucdu iskusi ayay uqabtaan qofkasta ayadoon laga fiirinay isirkisa, midabkiisa, wadankuu udhashay, jinsigiisa, naafonomadiisa, ama da'diisa.
- **Dhagaysi Cadaalad kudhisaa:** Waxaan dalban karaa Dhagaysi Dacwadeed oo Cadaalad ah haddii aanan kuqancin go'aanka kusaabsan uqalmidayda gunooyinka WIC.
- **Macluumaadka Wareejinta:** Waxaan uwareegi karaa xarun kale oo caafimaad oo ay leedahay WIC. Waxaan kacodsan karaa shaqaalahad WIC inay isiyaan macluumaadka wareegida.
- **Arimaha Sirta ah:** Macluumaadkaygu waa mid sir ah. WIC waxay kaliya u adeegsataa macluumaadkayga qaadashada adeegyada WIC, ilaa in qoraal ahaan iigu sheegaan maahee xarunta caafimaadku.

## HESHIISKA

### Waxaa qasab ah inaan aqbalo arimahaan WIC quseeya:

- Shaqaalahad WIC ayaa iisheegay Xaqquuqdayda iyo Waajibaadka isaraan iyo Shuruucda Barnaamijka WIC.
- Dhamaan macluumaadka aan siyo WIC waa mid dhab ah. Waxaan usheegayaa shaqaalahad WIC isla markaba haday jiraan wax isbadalo ah oo igu yimid.
- Shaqaalahad WIC ayaa hubin kara macluumaadkayga ayna kujirto cadadka qoyskayga iyo ilaha dhaqaale ee qoyskaygu helo.
- Haddii aan been sheego ama aanba runta qariyo si aan uhelo cuntooyinka WIC waxaa qasab igu noqon karta inaan dib ubixiyoo kaashka qiimaha cuntooyinkii WIC isiiyay.

- WIC waa barnaamij caawimaad oo heer federaal ah. Hadaan kutunto shuruucda WIC:
  - Shaqaalahad WIC ayaa qoyskayga kasaari kara barnaamijka WIC.
  - Waxaa la imarsiin karaa dacwad madani ama danbi ayadoo laraacaayo sharciga gobalka iyo kan federaalka.
- WIC ayaa cid kale lawadaagi karta macluumaadkayga hadii baaritaan dhanka jabinta shuruucda ah la igu wado.

### Anoo si electeroonig ah usaxiixaaya, waxaan ogolaanayaa:

- Inaan akhriyay, fahmay, aan aqbalay shuruucda iyo heshiiska kuqoran foomkaan.
- Inaan helay nuqul kamid ah foomkaan.

Saxiixa Kaqaybgalaha/Waalidka/Masuulka/Daryeelaha

taariikhda

Magaca kaqaybgalaha: Magaca ugu danbeeyaa, Ugu horeeyaa

**Shaqaalahad Xarunta Caafimaadka:** Kaliya waa inay saxiixaan Kaqaybgalaha/Waalidka Masuulka/Daryeeluuhu foomka waraaqda ah markii loobaahdo, tusaale ahaan markay jiraan cilado dhanka kumbuyutarka ama koronto la'aan.

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.

Washington State WIC Nutrition Program (Barnaamijka Nafaqada WIC ee Gobalka Washington) cidna ma takooro. Helida WIC ma saameynayso xaalada socdaalka.

## WAAJIBAADKA ISAARAN

- Waaan si sax ah u adeegsan doona Kaarkayga WIC. Waaan raaci doonaa tilmaamaha adeegsiga Kaarka WIC markaan tukaanka jogo iyo markaan dooranaayo cuntooyinka ay WIC ogoshahay.
- Waaan adeegsan doonaa cuntooyinka WIC iyo cuntooyinka caruurga anoo siin doona kaliya dadka kuqoran WIC. Waaan soocelin doonaa cuntooyinka iyo foormulada aana isticmaali karin waxaana kucelinayaa xarunta caafimaadka ee WIC.
- Waaan soosheegi doonaa kaararka WIC ee luma, laxado, ama halaaba waxaana usoosheegaya shaqaalaha WIC islamarkaba.

- Waaan si sax ah u adeegsan doona Kaarkayga WIC. Waaan ilaalsanayaa Kaarkayga iyo PIINkayga WIC. Waaan xaqijinayaa in qofkasta oon u ogolaado inuu kaarkayga WIC adeegsado uu yaqaano shuruucda WIC.
- Waaan kuladhaqmayaa WIC iyo shaqaalaha dukaanka qaab qadarin iyo xushmad kujirto.
- Waaan ilaalin doonaa balamahayga ama waxaan wici doonaa xarunta caafimaadka ee WIC haddii aanan imaan karin balanta. Hadaanan ilaalin balantayda waxay saamayn kartaa cadadka gunooyinka cuntada WIC ee aan qaato.

## SHRUUCDA BARNAAMIJKA WIC

Hadaanan raacin shruucdaan, waxaa suurtagal ah in qoyskayga laga saaro WIC ama lagu qasbo inay dib ubixiyaan ayna barnaamijka uceliyaan qiimaha gunooyinkii cuntada ee WIC laga siiyay.

- Macluumaad dhab ah oo dhamaystiran ugudbi WIC. Waxaa macluumaadka kujira karka aqoonsiga, xaaladaada uurka, ciwaanka gurigaaga, cadadka qoyskaaga, dhaqaalaha qoyskaaga iyo uqalmida Medicaid (ProviderOne), Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP, Barnaamijka Kaalmaatiga Cuntada), Temporary Assistance to Needy Families (TANF, Caawimaada Kumeelgaarka ah ee Qoysaska Tabaalaysan), ama Food Distribution Program on Indian Reservations (FDPIR, Barnaamijka Cunto Qaybinta ee Dadka Hindida ah).
- Marka ha iibin ama ha iskudayin inaad iibiso, kuganacsato ama cidkale kusadaqaysato Kaarka WIC, cuntooyinka iyo foormulada WIC. Tan waxaa kujira usamaynta si shaqsi ah, asagoo daabacan, hadal ahaan, ama layn karaan ama qaab kale lagu siiyo qofkale.

- Kaliya qaado cadadka WIC ee laguu ogolyahay bil kasta, adoo hal xarun kaqaadanaaya markiiba.
- Hagadan, ama ha iskudayin inaad gadato, cuntooyinka iyo foormulada WIC ee kaarka kujira kuwaasoon qayb ka ahayn gunooyinka cuntada WIC.
- Hasoo celin, ama ha iskudayin inaad sooceliso, cuntooyinka aad kugadatay kaarka WIC si aad lacag uga samayso, dayn ugu bixiso, cunto WIC aysan bixin ama cunto dheeraad ah oo kabadan gunada cuntada WIC.
- Waa inaadan halis galin ama aadan dhibaato ugaysan shaqaalaha xarunta caafimaadka ama dukaanka ama aadan burburin dukaanka ama hantidada WIC.

**Wixii macluumaad ah oo kusaabsan Xadgudubyada iyo Xayiraadaha Kaqaybgalayaasha WIC, kafiiri Washington Administrative Code (Sharciga Maarinta ee Washington) 246-790-530.**

<http://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=246-790-530>

## WASHINGTON WIC CIDNA MA TAKOORTO.

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salysan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), naafonimada, da'da, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiiga. Shaqsiyadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay kala xidhiidhaan Hay'adda Gobalka ama deegaanka ee mas'uulka ka ah maamulka barnaamijka ama xarunta TARGET ee USDA lambarka (202) 720-2600 (cod iyo TTY) ama waa inay la xidhiidhaan USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeeggaa Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

- Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta: <https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay , iyada oo la wacayo (866) 632-9992, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eeddeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la soo eeddeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in loogu diraa USDA;
- Boostada: U.S. Department of Agriculture  
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights  
1400 Independence Avenue, SW  
Washington, D.C. 20250-9410; ama
- Fakiska: (833) 256-1665 ama (202) 690-7442; ama
- iimaylka: [program.intake@usda.gov](mailto:program.intake@usda.gov)



DOH 962-987 November 2023 Somali

Si aad dukumiintigaan ugu heshid qaab kale, wac 1-800-841-1410. Haddii aad tahay macaamiil dhagool ah ama aad maqal culus tahay, fadlan wac 711 (Washington Relay) ama iimayl udir [WIC@doh.wa.gov](mailto:WIC@doh.wa.gov).